**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

**Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska**

# SIYAASADDA QARAN EE SHAQO-CARBINTA

**2019**
**HARGEYSA**

# KELMADDA WASIIRKA



Farxad weyn bay u tahay Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska in ay soo bandhigto Siyaasaddan Qaran ee Shaqo-carbinta ee Somaliland. Waa markii ugu horeysay ee siyaasad noocan oo kale ah la sameeyo muddo ku siman 27 sanno, taas oo ku salaysan yoolasha iyo ujeeddooyinka Qorshaha Horumarinta Qaranka ee Somaliland; oo muhiimadiisa ugu wayni tahay sidii loo yarayn lahayd tiradda dhalinyarta shaqo la'aantu hayso, iyadoo loo marayo kobcinta xirfaddooda iyo waxbarashadoodaba.

Iyadoo tan maskaxda lagu hayo, Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoysku waxay qaaday talaabooyin lagu dayan karo si ay u hubiso in xirfadda iyo aqoonta dhalinyarada Somaliland ee goobaha shaqada kor loo qaado inta la diyaarinaayo qorshayaasha istaraajiyadeed iyo siyaasaddaha la xidhiidha shaqo-abuurka, ee ay ka mid tahay Siyaasaddan Qaran ee Shaqo-carbintu, si loo yareeyo shaqo-la'aanta saraysa ee Somaliland.

Siyaasadda Qaran ee Dhalinyaradda Somaliland ayaa ku joogta wakhtigii ay ka jawaabi lahayd xaddiga badan ee dhalinyaradda shaqo-laantu hayso sababo la xidhiidha xirfaddooda iyo aqoontooda shaqo ee hoosaysa ee aanay ka helin goobaha waxbarasho. Haddaba, xukuumadda Somaliland waxay ahmiyad weyn siisay arrintan qaran, waxaanay soo dejisay habab wax ku ool ah oo lagu hubinayo in dhalinyarada la geliyo goobaha shaqo, si loo kobciyo xirfaddooda, ayna iskula jaanqaadaan siyaasadaha xafiisyada hagga isla markaana maamula fursadaha kooban ee shaqo-carbineed ee ka dhex jira hay'adaha dawladda iyo shirkadaha gaarka loo leeyahayba.

Waxa aan aad ugu niyad samay in Siyaasaddan Qaran ay fududayn doonto xayndaabka iyo hagayaasha suurto gelin kara fursadaha kooban ee shaqo-carbineed sidii lagu heli lahaa. Sidaas awgeed, wasaaraddaydu waxay ka shaqayn doontaa sidii loogu guulaysan lahaa hirgelinta siyaasadda ee wadanka oo dhan. Waxaanan ku adkaynayaa dhammaan daneeyayaasha kala duwan in ay siyaasaddan siiyaan tixgalin gooni ah, isla markaana dareemaan masuuliyadda inaga wada saaran sidii xirfadda iyo aqoonta dhalinyaradeena loo kobcin lahaa. Sababtoo ah, dhalinyaradu waa kuwa mustaqbalka wadankeena oo dhami ku tiirsan yahay. In lagu quweeyo isla markaana lagu taageero xirfaddaha u muhiimka ah ee ka caawin kara suuqa shaqaduna waa masuuliyad la inaga wada rabo in aynu dareenkeeda lahaano.

Ugu danbayntii, waxaan si gaar ah ugu mahadnaqayaa dhammaan shakhsiyaadkii iyo hay'addihii aan waxba ka hakran sidii siyaasaddan looga dhigi lahaa mid rumowda. Wasaaradda waxaa ka go'an sidii Siyaasadda Qaran ee Shaqo-carbintu ay u hirgali lahayd.

Hinda Jaamac Xirsi Gaani
Wasiirka Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska

# MAHADNAQ



Samaynta Siyaasaddan Qaran ee Shaqo-barashadu may suurto gasheen haddii aanay si hagar la' u taageerin haay'ado iyo shaqsiyaad muhiim ahi.

Waxaanu si gaar ah u xusaynaa Cabdiqaadir Dayib Askar, Mohamed Elmi Aden Agaasimihii hore ee MESAF iyo Eng. Yusuf Garas oo aqoontooda iyo khibradooda gacan weyn kaga geystay dejinta iyo hirgelinta Siyaasaddan.

Waxa sidoo kale aad ugu mahad naqaynaa dhammaan intii wada-shaqayntu na dhex martay intii la dejinayey Siyaasaddan, oo ay ku jiraan wasaaradaha, ururada bulshada, hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ah iyo ganacsiyada gaarka loo leeyahayba. Si gaar ah waxaanu u xusaynaa Som Power, Manhal Hospital, World Vision, Save the Children, Premier Bank, SONYO iyo SOS.

Ugu dambayn HAVOYOCO, Oxfam iyo bahda mashruuca *'Work in Progress'* ayaan uga mahad celinaynaa taageerada maaliyadeed iyo xirfadeed ee ay ka geysteen dejinta Siyaasaddan qaran.

**Md. Cabdirashiid Ibrahim Sh. Cabdiraxman**
**Agaasimaha Guud**
**Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska**
**Jamhuuriyadda Somaliland**



# TUSMO


**TUSMO** ........ **4**

**DIIWAANKA EREYADA GAABAN** ........ **6**

**EREY-BIXIN** ........ **7**

**DULMAR GUUD** ........ **8**

**HORDHAC** ........ **9**

**1.0 Gogol-dhig** ........ 9

1.1 Muhiimada Siyaasadda ........ 9

***2. UJEEDOOYINKA SIYAASADDA IYO XAYNDAABKEEDA*** ........ **11**

2.0 Hordhac ........ 11

2.1 Ujeeddooyinka ........ 11

2.1.1 Ujeeddada Guud ........ 11

2.1.2 Ujeeddooyinka gaarka ah ........ 11

2.2 Waxyaabaha Siyaasaddu Jideynayso ........ 11

2.3 Mudnaanta ........ 12

2.3.1 Kooxaha Mudnaanta leh ........ 12

2.3.2 Hay'adaha Mudnaanta Leh ........ 12

2.4 Sharciyada La Xidhiidha iyo Xayn-daabka Siyaasadeed ........ 13

2.4.1 Xayn-daabka Sharci ........ 13

**a) Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland** ........ 13

2.4.2 Xayn-daabka Siyaasadda ........ 15

**HANNAANKA IYO SHURUUDAHA** ........ **17**

3.0 Hordhac ........ 17

3.1 Hannaanka Xulashada ........ 17

3.1.1 Shuruudaha Shaqo-carbinta ........ 17

3.1.2 Xayeysiin ........ 17

3.1.3 Mabaadi'da Hagaya Hannaanka Xulashada ........ 18

Mabaadi'dan ayaa hagaya hannaanka lagu xulanayo shaqo-baradka: ........ 18

3.2 Muddada Tababarka Shaqo-Carbineed ........ 18

3.3 Faaiidooyinka Shaqo-carbinta ........ 18

3.3.1 Faadiiyoonka uu helayo shaqo-bartuhu ........ 18

3.3.2 Faa'iidooyinka uu helayo Xafiiska Marti-gelinaya Shaqo-carbintu ........ 19

3.4 Arrimaha laga rabo shaqo-carbinta ........................................................... 19
3.4.1 Shaqo-baradka ........................................................................................ 19
3.4.2 Xarunta Tababarka Shaqo-gelinta ....................................................... 19
3.5 Dhammaadka shaqo-carbinta ................................................................... 20
**QIIMEYNTA IYO DABA-GALKA SIYAASADDA ........................................ 21**
4.0 Hordhac ........................................................................................................ 21
4.1 Xayn-daabka Qiimaynta iyo Daba-galka ee Siyaasadda ............................ 21
4.2 Qiimeynta ay Samaynayso Xarunta Tababarka Shaqo .............................. 21
4.3 Qiimaynta ay Samaynayso Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoysku ........................................................................ 22
4.4 Dib-u-eegista Siyaasadda ........................................................................ 22

# DIIWAANKA EREYADA GAABAN

| | | |
|---|---|---|
| **AET** | - | African Educational Trust |
| **CCS** | - | Committee of Concerned Somalis |
| **HAVOYOCO** | - | Horn of Africa Youth Voluntary Organization |
| **HYDA** | - | Horn Youth Development Association |
| **M&E** | - | Monitoring & Evaluation |
| **MESAF** | - | Ministry of Employment, Social and Family Affairs |
| **NDP** | - | National Development Plan |
| **NIP** | - | National Internship Policy |
| **SONSAF** | - | Somaliland Non-State Actors Forum |
| **SMEs** | - | Small Medium Enterprises |
| **SVO** | - | Steadfast Voluntary Organization |
| **VTCs** | - | Vocational Technical Centers |
| **WAAPO** | - | Women's Action for Advocacy And Progress Organization |
| **WiP!** | - | Work in Progress! Alliance |

# EREY-BIXIN

**Qalin-jebis** – Qof dhamaystay waxbarasho kulliyadeed, Tababarka iyo Waxbarashada Farsamada Gacanta ama Jaamacadda.

**Xarunta Tababarka/Xafiiska Martigelinaya Shaqo-carbinta** – Xarun dawladdu leedahay ama gaar loo leeyahay oo ogolaata in shaqo-bartuhu aqoontiisa iyo xirfadiisa shaqo kor ugu-qaado.

**Shaqo-Carbin** – Tababar ku meel gaadh ah oo la siiyo ardayda aan shaqayn ee ka qalin jebisay ama ka diiwaan gashan Kulliyadaha, Tababarka iyo Waxbarashada Farsamada Gacanta (TVET) ama jaamacadaha, si loo kobciyo xirfadooda shaqo helid.

**Shaqo-Barad** – Qof aan shaqayn oo dhigta ama ka qalin jabiyay goobaha waxbarasho ee Kulliyadaha, Tababarka iyo Waxbarashada Farsamada Gacanta (TVET) ama jaamacadaha, kaas oo ujeedkiisu yahay/tahay sidii uu u heli lahaa aqoon iyo xirfad shaqo si uu u kordhiyo fursadiisa shaqo-helid.

**Warqad Cadayn ah-** Warqad cadayn ah oo la siiyo qofka shaqo-barad ka ah kadib marka uu dhamaysto barnaamijka shaqo- carbineed ee muddo cayiman.

# DULMAR GUUD

Somaliland waa wadan ay dhalinyaraddu ka tahay 70% (boqolkiiba todobaatan). Inkastoo tiro aad u saraysa oo arday ah ay isqoraan waxbarashada sare (sida: Kulliyadaha, Tababarada iyo Waxbarashada Farsamada Gacanta iyo Jaamacadahaba), sidoo kalana kumanaan kale ay ilaa imika qalin-jebiyeen, haddana nasiib darro, tiro kooban ayaa shaqo hela. Tani waxay saameyn ku yeelataa dhalinyaradda taas oo ay niyadjabiso xaqiiqada taala Somaliland. Kuwo badan oo kamidina waxay iskaga tagaan wadanka si ay meel kale uga raadsadaan shaqo wanaagsan amaba waxaabay ku kacaan rabshado si ay u noolaadaan. Sababtan ayaa keentay in dawladda Somaliland mudnaan sare siiso shaqo-abuurka iyadoo u maraysa samaynta siyaasad u qaabaysan dhalinyarada aan horumarinta xirfadahooda iyo helitaanka waxbarasho iyo tababaro tayo leh loo tixgalin siday ahayd.

Siyaasaddan Qaran ee Shaqo-carbinta waxaa loo sameeyay in ay hage u noqoto isla markaana taageerto dhalinyarada reer Somaliland ee soo qalin-jebisa, si ay uga helaan fursado meelo ay xirfadooda iyo waaya-aragnimadooda shaqo ku dhisaan ugana faa'idaystaan in aqoontoodii waxbarasho lagu xidho adduunka shaqada, waxaanay taageeraysaa shaqo-abuurka dhalinyaradda iyo horumarka Somaliland.

Siyaasaddan Qaran waxaa lagu dabbaqayaa hay'addaha dawladda iyo wadaagayaasha gaarka ah, waxaa sidoo kale loo adeegsanayaa ururrada bulshada ee rayidka ah, Ururrada Samafalka iyo Hay'addaha Qaramada Midoobay, si ay iskula jaanqaadaan siyaasadahoodii shaqaalaha iyo shaqo-baridda, ardayda Somaliland ee aan helin xirfado toos ah iyo aqoontii gaadhsiin lahayd suuqa shaqadana ay albaabka fursadaha ugu furaan. Siyaasaddan waxa laga soo dheegtay sharciyada iyo xayndaabka siyaasadeed ee Somaliland lagaga dhaqmo.

Siyaasaddan Qaran ee Shaqo-carbineed waxay dhiiri-galinaysaa in hanaanka shaqo-baradka lagu soo xulanayaa ay ahaato mid cadaalad iyo daahfurnaan ku dhisan. Shaqo-baradka waxaa lagu soo xulanayaa aqoon, matelaad cadaalad ku dhisan, tixgalin dadka laga tirada badan yahay iyo kuwa la takooro, iyo dadka baahiyaha gaarka ah qaba. Iyadoo ay sidaa tahay, siyaasaddani waxay si gaar ah u ansixinaysaa dan-wadaag u dhaxeeya xarunta tababarka iyo shaqo-baradka.

Ugu danbayntii, Siyaasaddan Qaran ee Shaqo-carbintu waxay leedahay hab cad oo lagu dabagalo isla markaana lagu qiimeeyo hawl-gudashada shaqo-baradka inta lagu gudo jiro shaqo-carbinta. Qorshaha dabagalka iyo qiimaynta waxaa wada hirgalinaya dhammaan daneeyayaasha (Tus. Xarunta tababarka iyo Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska) si loo hubiyo in shaqo-baradku ay kobcinayaan xirfadooda iyo aqoontooda goobta shaqo. Tani waxay dawladda ka caawinaysaa dedaalka ay ugu jirto sidii loo heli lahaa dhalinyaro xirfad leh iyo hoos u dhigidda shaqo-la'aanta dhalinyarada Somaliland haysata, si loo siiyo fursado ay ku kordhiyaan xirfadooda iyo aqoontooda goobta shaqada, uguna suurto gasho in ay ku tartami karaan shaqo-raadiska.

1.

# HORDHAC

## 1.0 Gogol-dhig

Tan iyo markii ay Somaliland ay dib-ula soo noqotay xoriyadeeddi 18kii May 1991kii, Somaliland waxay la tacaalaysay xaalado adag oo bulsho, dhaqaale iyo siyaasadeedba. Haddaba, Somaliland waa wadan bulshadiisu u badan tahay dhalinyar, waana dhalinyarta kuwa inta badan saameeyaan dhibaatooyinka badan ee dhaqan-dhaqaale ee ka jira wadanku. Dhibaatada shaqo-la'aantu, tusaale ahaan waxay taabatay qoys kasta, dedaalada ilaa hadda la sameeyayna may xallin caqabadihii, inkastoo dawladdu gar-waaqsatay in baahi loo qabo in meesha laga saaro shaqo-la'aanta ku baahsan wadanka. Waa sababta keentay in Dawladdu abuurto Siyaasadda Qaran ee Shaqo-carbinta.

Si la mid ah wadamada soo koraya, Somaliland waxa ku suntan tahay mid ka mida wadama ugu sareeya xadiga shaqo-la'aanta. SONYO 2015kii waxay xustay in xaddiga shaqo-la'aantu uu aad u sareeyo magaalooyinka (tus. Hargeysa, Burco iyo Boorama). Tusaale ahaan, Hargeysa xaddiga shaqo la'aanteedu wuxuu marayay magaalada dhexdeeda 34%, halka miyiga uu ahaa 41%. Burco xadiga shaqo-laanteedu wuxuu ahaa magaalada 46%, miyigana 53%; halka Booramana xadiga shaqo-la'aanta magaaladu uu ahaa 69%, halka miyigana uu ahaa 62%.

Somaliland dadka da'doodu ka hoosayso 35 jir waxay bulshada ka yihiin boqolkiiba todobaatan (70%), halka ay ku socoto in boqolkiiba shan iyo todobaatan (75%) dhalinyarta Somaliland ay yihiin bilaa shaqo, si adagna ku helaan taageero dhaqaale iyo horumar xirfadeedba.[1] Inkastoo dawladda Somaliland ay danaynayso sidii loo horumarin lahaa xirfadda dhalinyarada, haddana xarumaha iyo dugsiyada tababarada iyo waxbarashada farsamada gacanta (TVET) ee Somaliland ka shaqeeyaa way yar yihiin. Waxaa sidoo kale muhiim ah in hoosta laga xariiqo in ay jiraan laba xarumo-shaqood oo kaliya oo ku kala yaala Hargeysa iyo Boorama, oo shaqeeyaa; in kastoo xogta ay ka helayaan loo-shaqeeyaha iyo shaqo-raadiyahaba ay aad u xadidan tahay. Tani waxay leedahay saameyn taban, oo laga xusi karo in boqolkiiba soddon (30%) ka mida dhalinyaradu ay ku kacaan rabshado kadib markii ay dayacaad kala kulmeen daneeyayaashii arrimaha dhalinyaradu khuseysay[2], halka tiro intaas ka badana u tahriibeen wadamada horumaray si ay u raadsadaan fursado dhaqaale oo kuwooda ka wanaagsan iyo nolol wanaagsan oo heersaraysa.

## 1.1 Muhiimada Siyaasadda

In kastoo goobaha tababarada iyo waxbarashadu ay kaalin laxaad leh ka gaysteen tirada sii koraysa ee ardayda soo qalin-jebisay wadanka oo dhan, haddana, markay soo qalin-jebiyeen xirfadaha ay ka helayaan maaha kuwo isku halayn leh. Xarumaha bixiya waxbarashada sare waxay bixiyaan maadooyin isku mid ah oo aan ku dhisnayn cilmi-baadhis isla markaana aan ka turjumayn baahida shaqo ee suuqa. Si kastoo ay ahaataba, ardayda badan ee leh xirfadaha isku midka ah iyadoo furasadihii shaqo ee suuquna xadidan yihiin, waxay keentay in tiro badan oo soo qalin-jebisay ay heli kari waayayaan shaqooyin. Werwerkanina waa ka keenay in

[1] SONYO 2015. *Youth Violence and Youth Role in Peacebuilding: Baseline Survey*, pp. 8
[2] SONYO 2015. *Youth Violence and Youth Role in Peacebuilding: Baseline Survey*, pp. 13

dhalinyar badan u tahriibaan qurbaha si ay nolol fiican u raadsadaan ama ugu dhacaan waxyaabo kale oo aan fiicnayn.

NGO-yada, shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo kuwa kaleba waxay bixiyaan xoogaa fursado shaqo-carbin ah, laakiin midkastaaba wuxuu leeyahay nidaamkiisa gunno iyo xulasho ee gaarka ah. Shirkadaha gaarka loo leeyahay waxay ku kala duwan yihiin xagga wakhtiga shaqo-barashada oo inta badan u dhaxaysa hal bil ilaa laba iyo toban bilood. Waxa intaas dheer oo ay ku kala duwan yihiin siyaasadaha hagaya barnaamijyadooda. Tusaale ahaan, NGO-yada qaar ayaa shaqo-bartaha siiya gunno, halka qaarkoodna ay tababaraha shaqo-carbinta oo kaliya siiyaan, halka qaarkoodna aanay midna, tababarada shaqo-carbineed iyo shaqo-bartahaba, waxba siinin. Kala duwanaanshahan dhinaca gunnada la bixinayaa wuxuu kala duway deegaankii shaqo-carbineed ee shirkadaha gaarka loo leeyahay. Haddaba, waxaa badatay baahida loo qabo in ay isla jaanqaadaan xayndaabka wakhti, siyaasadeed iyo hagayaasha habka doorashaduba.  Waana arrin qaran mar haddii ay jirto xaqiiqo muujinaysa in aanay wada jaanqaadayn xilalka kala duwan ee hay’addaha kala duwan u xilsaaran yihiin.

Dhinaca kale, dhalinyarada Somaliland waxaa ku adkaata in ay helaan caddaalad iyo sinaanshiyo loo siman yahay fursadaha xadidan ee shaqo-carbineed. Hay’ad kastaa waxay qaadaa talaabo ay ku shaqaalaysiinayso shaqo-bartayaal iyadoo raacaysa habab u gaar ah, in yar oo kamid ah ayaana aqoon kusoo xusha. Sababtaas baa keenta in dhalinyar badan niyad jabaan, marka xaqiiqadu tahay in aan fursadihii lagu soo xayaysiinayn madalo furan, isla markaana kala saaridda iyo xulashada shaqo-bartayaashu ay tahay mid aan cadayn oo aan nidaam caddaalad iyo daah-furnaan ah loo marin, taas oo sii dhiiri-galisay in waaxaha shaqaalaha ee hay’aduhu ay si aan sax ahayn u hawl galaan. Dhammaan waxyaabahaa aynu xusnay waxay dhalinyaradii ku keenayaan in ay ku dhib mutaan suuqii shaqada, iyadoo ay dheertahay in kumanaan kamida dhalinyaradu ay wadanka ka tageen si ay meelo kale uga raadsadaan fursado shaqo oo wanaagsan, taas oo wadanka ku keenaysa in dadkii waxbartay ee suuqa shaqada wax ka tari lahaa la waayo.

Waxay tani ku dhalisay Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska in ay samayso Siyaasaddan Qaran ee Shaqo-carbinta si ay uga jawaabto caqabadaha aynu kor ku xusnay ee soo waajahaya dhalinyarada Somaliland. Samaynta siyaasaddu waxay keensanaysaa in la helo istaraatijiyad dheeraad ah oo dhalinyarta loogu abuuraayo fursado shaqo, si dhalinyarta loogu diyaariyo deegaan xasiloon, waxna ku baran karaan. Siyaasaddan Qaran ee Shaqo-carbintu waxay ahmiyadda koowaad siinaysaa baahida loo qabo in dhalinyarta lagu kordhiyo xirfado dheeri ah oo anfacaya suuqa shaqada. Ujeedka siyaasadduna waa in kor loo qaado isla markaana ay isla jaanqaadaan siyaasadaha, hagayaasha iyo hab-raacyada loo hubiyo in dhalinyarta qalin-jebinaysaa ay helaan xirfado ka dib marka loo sameeyo nidaam shaqo-barasho oo isku mid ah.

# 2. UJEEDOOYINKA SIYAASADDA IYO XAYNDAABKEEDA

## 2.0 Hordhac

Cutubkani wuxuu iftiiminayaa waxyaabaha u muhiimka ah Siyaasaddan Qaran ee Shaqo-Carbinta. Waxaa cutubkan ku xusan ujeeddooyinka siyaasadda, mabaadi'da hagaysa iyo meelaha ay mudnaanta siinayso. Intaas waxa dheer, faahfaahin dheeraada iyo sharaxaado ku saabsan shuruucda la xidhiidha iyo muhiimada ay siyaasaddu ku dhisan tahay.

## 2.1 Ujeeddooyinka

### 2.1.1 Ujeeddada Guud

Ujeeddada guud ee Siyaasaddan Qaran ee Shaqo-carbintu waa in la dejiyo hagayaal, laguna taageero dhalinyarada soo qalin-jebisa ee reer Somaliland fursado ay ka heli karaan xirfado shaqo, isla markaana xirfadoodii waxbarasho lagu xidho suuqii shaqada, waxaanay taageeraysaa shaqo-abuurka dhalinyaradda iyo horumarka Somaliland.

### 2.1.2 Ujeeddooyinka gaarka ah

Ujeeddooyinka gaarka ah ee Siyaasaddan Qaran ee Shaqo-carbintu waa in:

- Ay isla jaanqaadaan halbeegyada, siyaasadaha, hagayaasha iyo hababka loo marayo siyaasadda barnaamijyadda shaqo-carbinta ee shirkadaha gaarka loo leeyahay, hay'addaha dawladda iyo ururrada bulshada ee Somaliland;
- La hago dhammaan barnaamijyada shaqo-carbinta si loo soo saaro shaqo-barad leh khibrad iyo xirfad shaqo oo suuqa shaqada ku tartami kara kana jawaabi kara baahiyaha suuqa;
- La hubiyo danta ay isku qabaan shaqo-bartaha iyo xarunta tababarku;
- La dardar galiyo caddaaladda, sinaanshaha iyo daahfurnaanta shaqaaleysiinta iyo hanaanka xulashada;
- La dhiso habdhaqanka shaqada ee dhalinyarta dhexdeeda, oo ay ka mid tahay kartida shaqo iyo xirfadaha shaqo-helida si ay si taban wax ugu biiriyaan xarunta tababarka;
- Hoosta laga xariiqo sinaanshaha ragga iyo haweenka marka la joogo goobta shaqada, iyadoo la taageerayo sidii haweenka dhalinyarta ah dhaqaalahooda, kobcintooda iyo hogaamintoodaba loo tixgelin lahaa.

## 2.2 Waxyaabaha Siyaasaddu Jideynayso

a) Barnaamijyada Shaqo-carbintu waa in ay u hogaansan yihiin qorshaha shaqaalaha iyo qorshaha xirfadaha ee u yaala xarunta tababarka, iyo u

sinaanta shaqaaleysiinta oo ay ka mid tahay baahida loo qabo in qaybaha bulshadu ka wada dhex muuqdaan;

b) Barnaamijyada Shaqo-carbintu waa in ay in ahaadaan kuwo xirfadaha kordhiya, qofkana kobciya, sidoo kalena ah barnaamijyo la qiimayn karo oo waaqica ku salaysan;
c) Waa in hannaan caddaalad iyo daahfurnaan ku dhisan la raacaa, oo ay soo galayso in fursadaha ay u sinaadaan haweenka dhalinyarada ahi;
d) Waa in habka maamulka tayada shaqaalahu uu qiimayn karo waxtarka shaqo-baradku kusoo kordhin karo xarunta ama xaruntu kusoo kordhin karto shaqo-bartaha;
e) In la qeexo ujeeddada barnaamijka shaqo-carbinta iyada oo la ansixinaayo marka u horeysaba; iyada oo loo marayo hannaan ku dhisan isfahan labada dhinac ee xarunta tababarka iyo shaqo-bartaha u dhaxeeya;
f) In loo diyaariyo barnaamijka shaqo-barasho hagayaal/buug-yareyaal sharaxaya sida shaqo-carbinta loo fulinayo, iyadoo diirada la saarayo tababarka hore ee soo dhoweynta, kormeerka, hab-dhaqanka shaqada, xirfadaha shaqo iyo guulaha la filayo in barnaamijka laga gaadho;
g) In loo qaybiyo hagayaasha/buug-yarayaasha dhammaan xarumaha tababarka iyo shaqo-baradkaba ka hor inta aanu bilaabmin barnaamijka shaqo-carbineed;
h) In loo soo saaro xarumaha tababarka iyo shaqo-baradkaba hageyaal ku saabsan tayeynta barnaajimka shaqo-barasho si loo hubiyo in barnaamijku noqdo mid tayo leh;
i) Barnaamijka shaqo-barasho ee si fiican loo qaabeeyay waa in uu taageerayo in si wadajir ah ay uga faa'iidaan xarunta tababarka iyo shaqo-baradkuba.

## 2.3 Mudnaanta

### 2.3.1 Kooxaha Mudnaanta leh

Siyaasaddan Qaran ee Shaqo-carbintu waxay mudnaanta siinaysaa qaybahan soo socda:

a) Ardayda ka diiwaan gashan goobaha waxbarasho (TVET, kulliyad waxbarasho, jaamacad, i.w.m) ee barnaamijka shaqo-carbintu uu yahay qayb kamida waxbarashadooda;
b) Ardayda ka diiwaan gashan goobaha waxbarasho ee doonaya in ay waxbarashadooda ku kabaan fursado shaqo-carbineed;
c) Dhalinyarta ka qalinjebisay goobaha waxbarasho eek or ku xusan, oo shuruud lagag dhigayo inay waxbarashda dhammaysteen labadii sanno ee ugu dambeeyay.

### 2.3.2 Hay'adaha Mudnaanta Leh

Siyaasaddan Qaran ee Shaqo-carbintu waxay saamaynaysaa hay'adahan hoos ku xusan:

a) Hay'addaha Dawladda: waxa kamida wasaaradaha, komishanadda iyo wakaaladaha/hay'addaha madaxa banana;
b) Hay'addaha Gaarka loo leeyahay: waxa kamida shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo shirkadaha yaryar;
c) Ururrada Samafalka aan Dawliga ahayan (NGOs), Ururrada Bulshada iyo Hay'addaha Qaramada Midoobay.

## 2.4 Sharciyada La Xidhiidha iyo Xayn-daabka Siyaasadeed

Samaynta siyaasaddan qaran ee shaqo-carbintu waxay leedahay sharciyad iyo siyaasad ay salka ku hayso, kuwaas oo taageeray in la sameeyo. Dastuurka Somaliland iyo dhamaan sharciyada kale ee jira waxay taageero u yihiin sameynta siyaasaddan sida ku faahfaahsan qaybaha soo socda. Waliba waxa siyaasadda si gaar ah looga soo dheegtay Qorshaha Horumarinta Qaranka ee 2aad, Siyaasadda Qaran ee Dhalinyarada iyo Qorshaha Istaraatijiyadeed ee Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska, kuwaas oo dhammaan ka jawaabaya baahida loo qabo in fursado shaqo loo abuuro ardayda qalin-jebinaysa ee Somaliland. Walow ay jiraan Qorshayaashaa iyo siyaasadahaa diiradda saaraya arrimaha dhalinyaradu; hadan ma tilmaamayaan baahida loo qabo shaqo-carbinta.

### 2.4.1 Xayn-daabka Sharci

#### a) Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland

Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland si cad ayuu u iftiimiyey shaqo abuurka dhalinyarada[3]. Dastuurku wuxuu dawladda ku baraarujiyay in dareen gaar ah loo yeesho dhalinyarada si ay u helaan waxbarasho iyo fursado shaqo. Sida Dastuurku dhigayo, Jamhuuriyadda Somaliland waxay u haysaa tixgelinta u saraysa dhalinyarada iyo arrimahooda; sidii kor loogu qaadi lahaa xirfadooda, aqoontooda iyo waayo-aragnimadooda shaqo. Qaybta 1aad, Xubinta 2aad, Qodobka 11aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland, oo diirada saaraya dhaqaalaha wadanku wuxuu odhanayaa "Si loo xaqiijiyo kobcinta wax-soo-saarka, kor-u-qaadidda heerka nolosha, abuuridda goobo shaqo, iyo guud ahaan horumarinta dhaqaalaha dalka, Dawladdu waxay dejinaysaa siyaasadda guud ee dhaqaalaha, oo ku salaysan mabaadi'da suuqa xorta ah iyo is-garabsiga hantida gaar ahaaneed; hantida wadareed, hantida Qaranka iyo maalgelinta shisheeyaha." Tani waxay ka turjumaysaa in wadanku ahmiyad gaara siinayo abuuritaanka fursado shaqo oo loo sameeyo muwaadiniinta Somaliland- oo dhalinyartu ay ka mid yihiin. Iyadoo tan laga duulaayo, Xeerka kala Xadaynta Nidaamka Xukuumadda iyo Hay'addaha Madaxa Banaan[4] wuxuu siinayaa masuuliyadda shaqo-abuurida Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska. Masuuliyaddan waxa ka dhalanaya in Wasaaraddu abuurto deegaan

[3] Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland
[4] Xeer Lr. 01/2018

u suurto gelinaya dhalinyarada in ay shaqooyin ka helaan Hay'addaha Dawladda iyo shirkadaha gaarka loo leeyahayba.

**b) Xeerka kala Xadaynta Nidaamka Xukuumadda iyo Hay'addaha Madaxa Banaan** [5]

Siyaasaddani waxay salka ku haysaa Xeer Lr 70/2015 oo ah sharci dhaqan-gal ah oo ay ansixiyeen golayaasha Qaran iyo Madaxweynuhuba. Xeerku wuxuu jideynayaa in ay tahay masuuliyadda Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska in la abuuro fursado shaqo iyo xirfadihii ay ku shaqo tagi lahaayeen dhalinyartu, waxaana si cad loogu sheegay qodobka 41aad. Isla qodobkan, faqradiisa 10aad waxay dhiiri-gelinaysaa in xirfado waxbarasho iyo xirafada shaqaba loo abuuro dhalinyarada. Faqradiisa 13aad waxay sheegaysaa dejinta iyo fulinta siyaasadda horumarinta dhalinyarada, faqradiisa 14aadna waxay taabanaysaa muhiimada ay leedahay in la isku-dubarido barnaamijyada taageeraya arrimaha dhalinyarada, halka faqradiisa 16aadna ay si kooban u sharxayso ka hortagga iyo ka wacyi-gelinta dhalinyarada arrimaha caqabada ku ah ee soo waajaha ee ay ka midka yihiin tahriibka, shaqo-la'aanta iyo maandooriyayaashu iyo iskaashiga hay'addaha dawladda.

**c) Xeerka Shaqaalaha Dowladda Somaliland ee 1996**[6]

Xeerka Shaqaalaha Dowladda Somaliland, oo ku salaysan Axdi Qarameedkii 1993, ayaa weli dhaqan gal ah iyada oo aan wax-ka-bedel lagu samayn ilaa maanta. Xeerkani wuxuu hagaa shaqaalaha Dowladda oo ay qayb aad u muhim ah ka yihiin dhalinyarta ka qalinjebiska ahi. Xeerka Shaqaalaha Dowladdu wuxuu qaabeeyaa shaqaalenimada dadka reer Somaliland ee ka shaqeeya haay'adaha Dowladda. Xeerku wuxuu ku dabaqmaa shaqaalaha Dowladda dhexe ee rayidka ah. Dhalinyaradu door laxaad leh ayay ka qaataan shaqaaleysiinta Dowladda.

**d) Xeerka Gobolada iyo Degmooyinka (Is-maamul)** [7]

Xeerkani wuxuu xooga saaraa shaqaalaha Dowladda, sida ku cad Qodob 59(4) ee Xeerka Gobolada iyo Degmooyinka, oo si kooban uga hadla bedqabka, daryeelka iyo la dhaqanka shaqaalaha ku sugan goobaha shaqada.

**e) Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah** [8]

---

[5] Xeer Lr. 70/2015
[6] Xeer Lr. 7/96
[7] Xeer Lr. 23/2002
[8] Xeer Lr. 31/2004

Kani waa xeerka aas-aasiga ah ee khuseeya shaqaalaha ka hawl gala ganacsiyada gaarka ah iyo hay'adaha madaxa banaan, wuxuu si waafiya u qeexaa xuquuqda iyo waajibaadka shaqaalaha intay ku sugan yihiin goobta shaqo. Xeerkani wuxuu dhiirigeliyaa shaqo-abuurka dhalinyarada, isaga oo faraya hay'adaha dawladdu inay abuuraan xaalado dhiirigelinaya in dhalinyartu ka qayb qaataan horumarka dhaqaale ee Somaliland.

### 2.4.2 Xayn-daabka Siyaasadda

**a) Qorshaha Horumarinta Qaranka ee Somaliland (1aad iyo 2aad)**

Qorsheyaasha Horumarineed ee Somaliland waxay ahmiyad weyn siiyaan shaqaalaysiinta dhalinyarada. Horumarinta Dhaliyarada waxa si gaar ah loogu xusay Hiigsiga Somaliland ee 2030, wadaagaha Arrimaha Bulshada: 'dal dhalinyartiisu bed qabaan, isku kalsoon yihiin, horumarka ka fikirayaan una diyaarsan yihiin in ay si buuxda uga faa'iideyaan awoodooda.' Qorshaha Qaranka ee Horumarineed wuxuu si qeexan mudnaan u siinayaan arrimaha dhalinyarada, taas oo ka turjumaysa sida ay dhalinyaradu muhiim ugu yihiin horumarinta dalka. Dedaal badan ayaa la galiyey si loo hubiyo in dhalinyartu ka qayb qaataan arrimaha bulshada, dhaqanka, dhaqaalaha iyo muwaadinimo. Qorshayaasha arrintan lagu xaqiijinaayo waxa ka mid ah abuurida barnaamijyo carbin-shaqo, taageerida ganacsiyada dhalinyarta iyo dhiirigelinta dedaalada ay wadaan is-xilqaameyaasha dhalinyarada ahi.

**b) Siyaasadda Qaran ee Dhalinyarada Somaliland**

Siyaasadda Qaran ee Dhalinyaradu waxay hiigsanaysaa helida bulsho da'yarteedu bed qabaan oo isku kalsoonyihiin, kuna faanaan dalkooda hodanka ah iyo dhaqanka suuban ee Islaamka. Waa in dhalinyarad xuquuqdoodu ilaashanay oo ay si siman uga qayb galaan arrimaha siyaasadda. Dhalinyartu waa inay helaan fursado ciyaareed, bulsho, waxbarasho iyo shaqo oo aan xadidnayn. Shaqaaleysiinta dhalinyarada, dhaqaalaha iyo fursadaha shaqo waa mid ka mid ah 12ka arrimood ee Siyaaasadda Dhalinyarada Qaran mudnaanta siisay. Siyaasaddani waxay jideynaysaa hanaan ay ku shaqeeyaan dhamaan daneeyayaasha arrimaha dhalinyaradu.

Siyaasadda Dhalinyarada waxaa ka go'an in la isku dubarido barnaamijyada socda ee lagu kobcinayo xirfadaha shaqo ee dhalinyarta, ka qayb galka dhalinyarada ee shaqo abuurka (gaar ahaan kobaca ganacsiyada dhalinyarta ku haboon), kor-u-qaadida hal-abuurka ganacsi ee da'yarta iyo in dhammaan dhalinyarada Somaliland si haqab la' u helaan xogta shaqooyinka banaan. Saamiga shaqooyinka banaan marka la barbar dhigo dhalinyartu aad buu u hooseeyaa guud ahaan Somaliland; iyadoo lagu qiyaasay 28% wiilasha iyo 17% gabdhaha (dhallinyar 15-24 jirro ah oo ku sugan Borama, Hargeysa iyo Burco).[9]

---

[9] SONYO 2015. *Youth Violence and Youth Role in Peacebuilding: Baseline Survey*, pp. 10-11

### c) Qorshaha Istraatijiyadeed ee Wasaaradda Shaqo-galinta, Arrihamah Bulshada iyo Qoyska ee 2018-2021

Wasaaradda Shaqo-galinta, Arrihamah Bulshada iyo Qoyska ayaa u xil-saaran fulinta Siyaasaddan Qaran ee Shaqo-carbinta; taas oo ku salaysan hiigsiga Wasaaradda ee ah abuurida " bulsho ay hogaamiyaan xoog shaqaale oo carbisan, hal-abuur iyo hawl-qabad sareeya leh." Wasaaraddu waxa ay u adeegtaa dadyowga reer Somaliland ee shaqada la' isla markaana diyaarka u ah inay kobciyaan xirfadahooda shaqo. Wasaaraddu waxay si gooni ah ugu adeegtaa qaybo gooniya oo bulshada ah, sida: haweenka, caruurta, dadka naafada ah iyo qayba kale ee bulshada ka takooran. Wasaaraddu waxay u taagantay ilaalinta xuquuqda ay qaybahan bulshadu u leeyihiin helida fursado shaqo oo loo siman yahay. Si hiigsigan loo xaqiijiyo, Wasaaraddu waxay wada shaqayn dhow la leedahay dhammaan daneeyayaasha fuliya barnaamijyada shaqo-abuurka iyo awood-siinta haweenka si ay uga qayb galaan goleyaasha qaranka ee kala duwan. Wasaaraddu waxa ay dhawaan samaysay Qorshaha Istaraatijiyadeed ee 2018-2021 oo looga gol-leeyahay dhimidda heerka shaqo-la'aaneed ee dhalinyarta Somaliland iyo kobcinta xirfadahooda (hoos ka eeg lifaaqa).

### d) Istaraatijiyadda Waxbarashada iyo Tababarada Farsamada Gacanta

Istaraatijiyadda Somaliland ee Tababarada iyo Waxbarashada Farsamada Gacanta[10] waxa loogu talo galay inay hagto barnaamijyada Farsamada Gacanta ee laga fulinaayo Somaliland. Istaraatijyaddani waxa ay suurto gelinaysaa kor-u-qaadida heerka farsamada gacanta iyo in xarumaha bixiya farsamada gacanta loo diyaariyo loona qaabeeyo inay noqdaan dugsiyo iyo kulliyado qaran. Istaraatijiyaddani waxay ka turjumaysaa baahida xirfadeed ee ay qabaan dhalinyarada Somaliland iyadoo la adeegsanayo qorshe balaadhan oo lagu taageerayo horumarka dhaqaalaha iyo dabar-goynta saboolnimada.

Ujeeddada aas-aasiga ah ee siyaasaddan farsamada gacantu waa in la xoojiyo, la hago, lana mideeyo hawlaha Farsamada Gacanta ee Somaliland. Baaqa Siyaasaddeed ee Dowladda ee ku xusan Siyaasadda Qaran ee Waxbarashasada 2015-2030 ayaa hoosta ka xariiqaysa muhiimada ay Tababarada iyo Waxbarashada Farsamada Gacantu u leeyihiin horumarka dhaqaalaha. Dowladda Somaliland waxa ay qirsantahay kaalinta Farsamada Gacantu ka geysato helida xoog shaqaale oo ku qalabaysan xirfado tayo leh oo la jaanqaadaya horumarka iyo warshadeynta dalka.

[10] Siyaasazdda Qaran ee Waxbarashada 2015-2030

# 3. HANNAANKA IYO SHURUUDAHA

## 3.0 Hordhac

Shaqo-Carbintu waa barnaamij muddo kooban soconaya oo qofka shaqo-baradka ah lagu kormeerayo tababar-shaqo oo la xidhiidha waxbarashadiisa ama shaqooyinka uu rabo inuu qabto mustaqbalka. Waxa ay isugu jirtaa shaqo iyo waxbarasho qaabaysan oo leh ujeeddooyin qeexan oo ku salaysan Siyaasadda Shaqo-carbinta Qaranka. Cutubkani waxa uu ka koobnaan doonaa qaybahan soo socda:

## 3.1 Hannaanka Xulashada

Xarunta bixinaysa tababarka shaqo waa inay martaa hannaan loo siman yahay oo hufan, qaybna ka tahay Wasaaradda Shaqo-galinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoysku.

### 3.1.1 Shuruudaha Shaqo-carbinta

Tartamayaasha ka qayb gelaya barnaamijyada shaqo-carbintu waa inay buuxiyaan shuruudahan:

a) Waa inuu yahay muwaadin reer Somaliland ah da'diisu u dhaxayso 15 ilaa 35 sano; iyadoo tix-gelin la siin doono muwaadiniinta ka weyn 35 jir ee u heelan inay bartaan xirfad;
b) Inuu labadii (2) sano uu dambeeyay dhameeyay kulliyad waxbarasho, dugsi farsamo amma jaamacad;
c) Uu ku jiro kulliyad waxbarasho, dugsi farsamo amma jaamacad.

### 3.1.2 Xayeysiin

Dhammaan fursadaha shaqo-carbineed waa in lagu xayeysiiyaa si bilaa lacag ah. Fursadaha waa in sidoo kale lagu xayeysiiyaa ilaha is-gaadhsiineed ee rasmiga ah, gaar ahaan kuwa Dowladda (jaraa'idka iyo idaacadaha), baraha bulshada iyo si kasta oo kale oo loo gaadhsiinaayo tirada ugu badan ee dhalinyarada ah, oo ay ku jiraan kuwa aan haysan adeegga internet-ku. Xayeysiiska shaqo-carbintu waa inuu si cad u xusaa waajibaadka laga rabo shaqo-baradka, tirada fursadaha banaan, waqtiga shaqo-carbinta (oo ay ku jirto saacadaha shaqadu) iyo waqtiga uu xidhmaayo qabashada codsiyadu.

### 3.1.3 Mabaadi'da Hagaya Hannaanka Xulashada

Mabaadi'dan ayaa hagaya hannaanka lagu xulanayo shaqo-baradka:

a) Aqoon: waa inuu codsaduhu leeyahay aqoon iyo xirfad la xidhiidha fursadda uu codsanaayo;
b) Ka qayb-gal cadaaladeysan: waa in fursadaha loogu qaybiyaa codsadayaasha kasoo jeeda goboladda iyo degmooyinka kala duwan ee dalka; mudnaan gaar ahna la siiyaa codsadayaasha kasoo jeeda miyiga iyo meelaha ay fursadaha shaqo ku yar yihiin;
c) Baahida gaarka ah: dhalinyarta baahiyaha gaarka ah qaba amma naafada ahi waa in ay ka qayb galaan fursadaha shaqo-carbinta, baahiyahooda gaarka ahna la tixgeliyaa;
d) Dadyowga laga tirada badan yahay: waa in 15% fursadaha shaqo-carbineed loo xidhaa dadka laga tirada badan yahay iyo dhalinyarta kasoo jeeda qoysaska danyarta ah.
e) Sinaanshaha jinsiga: waa in la qaadaa talaabooyin lagu dhiirigelinayo haweenka dhalinyarada ah si kor loogu qaado xirfadaha hogaamineed ee haweenka dhalinyarta ah. 30% fursadaha waa in gaar loogu xidhaa haweenka dhalinyarada ah.

## 3.2 Muddada Tababarka Shaqo-Carbineed

Shaqo-carbintu waxa ay qaadanaysaa muddo u dhaxaysa 2 bilood ilaa 6 bilood. Caadiyan, shaqo-carbintuwaa inay waqti ahaan u dhigantaa 5 cisho todobaadkii, oo maalin kasta 8 saacadood la shaqaynaayo. Waqti kan ka duwan ayey ku heshiin karaan shaqo-bartaha iyo xarunta tababarka bixinaysaa. Shaqo-carbintu ma ah shaqo rasmi ah laakiin waa in dhalinyarta shaqo-baradka ah mudnaan la siiyaa haddii ay soo baxaan fursado shaqo. Qofkiibaa waxaa loo ogol yahay ugu badnaan laba fursadood oo shaqo-carbineed si looga taxadiro in shaqo-barashadu dib u dhigto helida shaqooyin rigli ah.

## 3.3 Faaiidooyinka Shaqo-carbinta

### 3.3.1 Faadiiyoonka uu helayo shaqo-bartuhu

a) Khibrad, xirfado iyo aqoon la xidhiidha goobta shaqada;
b) Barashada dad muhiim ah iyo kasbashada xirfado shaqo oo aas-aasi ah: xidhiidhka iyo koox la shaqaynta;
c) Warqad cadayn ah marka uu dhamaysto shaqo-barashada;
d) Fasaxyada qaran iyo fasaxyada kale ee ay jideeyeen xeerarka shaqaale ee Somaliland (fasax sanadeed, fasaxa caafimaad darro, fasaxa umusha, fasaxa geerida/xanuunka ehelka ) marka laga reebo bixinta mushahar;
e) Gunno bille ah, lacag amma sifo kaleba, oo xaddigeeda ay si sanadle ah u go'aamin doonto Wasaaradda Shaqo-galinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoysku. Gunnadan ayaa waxaa bixin doona Xafiiska marti gelinaya shaqo-carbinta.
f) Kadib Shaqo-carbinta marku dhameysto waa inuu hela shaqo-bartuhu gacan qabasho ama hagid

### 3.3.2 Faa'iidooyinka uu helayo Xafiiska Marti-gelinaya Shaqo-carbintu

a) Xoog dhalinyaro oo jaban;
b) Curinta iyo aqoonta xafiiska oo kordha, iyadoo keenaysa in hal-abuurnimada iyo waxbarashada laga dhigto dhaqan;
c) Sumcad inuu ka helo iyadoo loo arkayo xafiis bulshada danaynaya oo gacan ka geysanaya yaraynta shaqo la'aanta dalka ka taagan;
d) Kasbashada dhalinyaro firfircoon, diyaarsan, karti badan oo aqoon leh;
e) Wasaaraddu waxa ay aqoonsan doontaa oo xafiisyada si fican ula dhaqma shaqo-baradka, kobciya xirfadooda ee 30% sanad kasta u qorsheeya barnaamijyada shaqo-barashada;
f) In loo keeno qof ka damiin ah shaqo-baradka inta aan la bilaabin tababarka shaqo.

## 3.4 Arrimaha laga rabo shaqo-carbinta

### 3.4.1 Shaqo-baradka

Shaqo-baradka waxaa laga rabaa in uu qabto waxyaabahan hoos ku xusan:

a) Inuu ku dabaqo aqoontii, aragtiyihii iyo xirfadihii uu bartay goobta shaqada;
b) Inuu ixtiraamo una hogaansamo shuruucda iyo siyaasadaha xafiiska martigelinaya;
c) Inuu u qabto shaqooyinka loo igmado si xilkasnimo leh, sida ku cad warqadda heshiiska;
d) Inuu ilaaliyo alaabta, qalabka iyo hantida xarunta bixinaysa tababarka shaqo;
e) Waa inuu wareejiyo dhammaan qalabka iyo agabka kale ee xafiiska martigelinaya ka hor dhammaadka muddada shaqo-carbinta;
f) Inuu ilaaliyo xogta muhiimka ah haday tahay af iyo qoraalba ee xafiiska.
g) In la helo tixraac sugan.
h) Inuu hal asbuuc oo ogaysiis ah bixiyo hadii uu shaqo kale helo mudada uu ku jiro carbiska ama shaqa baradka.

### 3.4.2 Xarunta Tababarka Shaqo-gelinta

Xarunta tababarka waxaa laga rabaa arrimahan soo socda:

a) Inuu dammaanad qaado in shaqo-bartuhu helo goob shaqo oo ammaan ah, oo ka bedqaba khataro caafimaad (mid jidheed iyo mid nafsiyeedba);
b) Inuu shaqo-bartaha u sameeyo waajibaad shaqo isla markaana diyaariyo heshiis sharci oo mudaysan oo ay wada galaan labada dhinac;
c) Inuu shaqo-bartaha siiyo qalab iyo agab ku filan oo uu shaqada sidii loogu talo galay ugu qabto;
d) Inuu u ogolaado shaqo-bartaha inuu xogta ugu badan ee suurto-gal ah ka helo hawlaha xafiiska; kana qayb qaato hawlaha la xidhiidha nooca shaqada uu ku tababaranayo;
e) In uu kormeer iyo qiimayn ku sameeyo shaqo-gudashada shaqo-bartaha;
f) Inaan loo dirin shaqo bartaha wax sumcadiisa/sumcadeeda ama sharaftiisa/sharafteeda dhaawacaya;
g) In lagu koobnaado lana ixtiraamo heshiika u dhexeeya shirkada iyo shaqo bartaha hadii wax laga badalayo laga wada tashado;
h) In la siiyo shaqo bartaha barnaamij cad (theory and practical) oo leh mudo cayiman.

i) Xaruntu si waafaqsan heshiishka shaqo bartaha iyo xarunta waa in ay kala wareegaan wixii qalab ah marka uu dhamaysto waqtigii shaqo barashada seddex cisho ka hor.

### 3.5 Dhammaadka shaqo-carbinta

Haddii shaqo-bartuhu si lagu qancay uu u gutay hawlihii shaqo-barasho, waa in la siiyaa warqad cadayn ah (Marka ay dhamaato mudada shaqo-barashadu waa in shaqo-bartaha iyo xaruntu ka wada fadhiistaan si waafaqsan heshiiskooda iskuna wargaliyaan in mudadii dhamaanayso. Shaqo bartaha qiimayn ka dib waa in la siiyo warqad cadayn ah iyo hadii xarunta tababarku leedahay wax kale oo dhiiri galin ah). Warqadda cadaynta ahi waa inay xustaa xirfadaha iyo khibradda uu korodhsaday qofka dhalinyarada ahi mudadii uu ku gudo jiray tababarka shaqo iyo guud ahaan shaqo-gudashadiisa. Taa bedelkeeda, hadii qofka shaqo-baradka ahi uu ku guul daraysto inuu guto hawlihii loo igmaday, amma u hogaansami waayo shuruucda xafiiska marti geliyey, heshiiskii ka dhexeeyay labada dhinac wuu buri karaa. Xarunta bixinaysa tababarka shaqo waxay burinaysaa heshiiskii lala galay shaqo-baradka muddo 72 saacadood gudahood ah kadib marka xafiisku bixiyo laba qoraal oo digniino ah oo 2 todobaad u dhexeeyaan. Shaqo baradku wax cadayn kuma laha xarunta
Shaqo-baradku wuu ka bixi karaa heshiiskii shaqo-carbinta hadii uu helo shaqo rigli ah amma uu dareemo in xafiiska marti gelinayaa si anshaxa ka baxsan ula dhaqmay si waafaqsan heshiiska u dhaxeeya shaqo bartaha iyo xarunta. Shaqo bartuhu waa inuu bixiyaa sadex cisho oo ogeysiis. Shaqo-baradku waa inu dacwad u gudbiyaa Wasaaradda Shaqo-galinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska hadii uu la kulmo wax dhibaato ah ama ka baxsan heshiiska shaqo baradka iyo xarunta ka hor inta aanu go’aansan inuu ka baxo heshiiska.

# 4. QIIMEYNTA IYO DABA-GALKA SIYAASADDA

## 4.0 Hordhac

Siyaasad kastaa waa inay leedahay nidaam lagu daba-gelayo oo lagu qiimaynaayo fulinta hawlaha ka dhalanaya siyaasadda ee ay wadaan haay'adaha dowladda, ururada aan dowliga ahayn iyo ganacsatadu. Dhammaan barnaamijyada shaqo-carbinta waa in daba-gal iyo qiimayn lagu sameeyaa si loo hubiyo in ujeeddooyinkii Siyaasadda la gaadhay. Si loo qiimeeyo in hawl-gudashada shaqo-baradka, tallaabooyinkan ayaa la raacayaa:

a) In la kormeero qorshaynta iyo fulinta barnaamijka shaqo-carbineed;
b) Warbixin bille ah in laga diyaariyo sida shaqo-baradku u wado hawlaha loo igmaday;
c) Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoysku waa inay samaysaa kayd lagu hayo xogta barnaamijyada shaqo-carbinta ee ay wadaan xafiisyada kala duwani;
d) Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoysku waa inay diyaarisaa hannaan cabashooyinka ay kusoo gudbiyaan shaqo-baradka iyo xarumaha marti gelineya tababarka shaqo-carbineed;
e) Kormeerro joogto ah waa in la sameeyaa si loo ogaado sida ay hawlaha shaqo-carbintu u socdaan.

## 4.1 Xayn-daabka Qiimaynta iyo Daba-galka ee Siyaasadda

Si barnaamijyada shaqo-carbintu si fiican ugu fulaan, waa in habka qiimeynta iyo daba-galku ahaada mid dhinacyo badani ka qayb qaataan. Talaabooyinkan waa in loo maraa qiimaynta iyo daba-galka:

i. In la qeexo ujeeddooyinka iyo yoolasha;
ii. In la isla qaato halbeegyo lagu cabirayo wax-tarka, fududeynta iyo la-jaanqaadka xilliga hawlaha shaqo-carbinta;
iii. In la helo meelaha gaabiska ah iyo casharada laga baran karo; iyo
iv. Ujeeddooyinka loo dejiyey bilowga barnaamijku waa inay hagaan qiimaynta guud ee la samaynaayo dhammaadka barnaamijka shaqo-carbinta.

## 4.2 Qiimeynta ay Samaynayso Xarunta Tababarka Shaqo

Xafiiska bixinaya tababarka shaqo waa inuu qiimeeyaa shaqo-gudashada qofka shaqo-baradka ah, iyadoo la raacayo hannaanka qiimeynta iyo daba-galka ee kor ku xusani. Xafiiska marti gelinaya shaqo-baradku waa inuu soo diyaariyaa qiimeyn bille ah oo lagu eegayo sida uu u shaqeeyay shaqo-baradku iyo meelaha uu gaabiska ka ahaa ee u baahan in laga sii badiyo. Tallaabadani waxay sii xoojinaysaa barashada shaqo-baradka.

## 4.3 Qiimaynta ay Samaynayso Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoysku

Wasaaraddu waxa ay samayn doontaa kormeer joogto ah oo ku aadan shaqo-baradka iyo xarunta bixinaysa shaqo-carbinta. Kormeerkan waxa loola dan leeyahay in lagu qiimeeyo sida shaqo-baradka loo adeegsado, in lasoo ururiyo warbixinaha billaha ah ee ay sameeyeen xarumaha bixinaya tababarka shaqo-carbintu iyo in dhalinta lagala taliyo meelaha ay ku liitaan.

## 4.4 Dib-u-eegista Siyaasadda

Siyaasaddan Qaran ee Shaqo-carbinta waa in dib-u-eegis lagu sameeyaa shantii sanno hal mar, amma marka baahi keensataa soo baxdo.